

Suurat Ad-Daariyaat

سُورَةُ الدَّارِيَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabynaa Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay dabaysha (Carrada kicisa).

وَالَّذِينَ تَرَكُوكُمْ دَرَوا ۝

2. Iyo daruurta xambaarta culayska (Roobka).

فَلَنْ يَنْهَاكُمْ وَقَرَأَ ۝

3. iyo doonnida sida fudud u socota.

فَلَمْ يَرِدْكُمْ يُسْرَى ۝

4. Iyo Malaa'igta amarka qaybisa.

فَلَمْ يَقُسِّمْكُمْ أَمْرًا ۝

5. Ee dadow waxa laydiinku goodin waa run.

إِنَّمَا تُوَعَّدُونَ لَكُمْ ۝

6. Abaalmarintuna waa sugantahay.

وَلَنْ يَلْهُمُ الظَّاهِرَاتِ ۝

7. Samada yuu Eebe ku dhaartay ee quruxda iyo waddooyinka leh.

وَالسَّمَاءُ ذَاتُ الْحُكْمِ ۝

8. Ee dadow waxaad ku sugantiihin hadal is khilaafsan.

إِنَّكُمْ لَمْ تُؤْمِنُوا بِخَلْقِنِي ۝

9. Iimaankana waxaa laga iilaa ruux dhumay.

يُوقَدُ عَنْهُ مِنْ أَنْفَكَ ۝

10. Wawaana la nacladay Beena-layaasha.

فَتُلْقَى الْمُرْضُونَ ۝

11. Ee ah kuwa xumaantooda (baad-dinimadooda) ku dhexhilmaansan.

الَّذِينَ هُمْ فِي عَمَرٍ فَسَاهُونَ ۝

12. waxay waydiin goorta abaal-marinta (qiyaamada).

يَسْتَأْذُونَ إِيَّاهُنَّ يَوْمَ الْلَّهِينَ ۝

13. Waana maalinta naarta lagu gubi.

يَوْمَ هُمْ عَلَى الْأَكْارِ مُفْتَنُونَ ۝

14. Laguna dhihi dhadhamiya cad-dibaaddii aad dadajisanayseen.

ذُو قُوَّا فَنَّحَكَ هَذَا الَّذِي كُنْتُ بِهِ سَتَّعِيلُونَ ۝

Sida Aayado badan sheegeen Eebe wuxuu ku dhaartaa wax badan oo khalqigisa ka mid ah, xaqna wuu u leeyahay, waxayna ku tusin adkaynta waxa la sheegi, sida Qiyaamada xisaabta iyo abaa-l-mariinta. Jidka toosanna waxaa ka leexda kuwa xaqqa isu diida ee beena-layaasha ah xumaantana dhex-dabbasha' Qiyaamada iyo soo bixintana si xun u waydiya-waxaa lagu abaa-l-mariin naar daran, saas daraadeed waxaa waajib ah in Jidka toosan la qaado ee Jannada aadaya, jidka xunna lagu leexdo ee Jahan-nama u baxa. Ad-Daariyaat (1-14).

15. Kuwa dhawrsaday waxay ku sug-naan Jannooyin iyo Ilo.

إِنَّ الْمُقْيَنَ فِي جَنَّتٍ وَعَمِيْنَ ﴿١٦﴾

16. Iyagoo qaadan waxa Eebe siiyay, maxaayeelax waxay ahaayeen horay kuwo wanaag fala.

أَخْذَنَ مَا مَاءَ أَنْهَمَ رَبُّهُمْ إِنَّمَا كَانُوا فَلَدَ ذَلِكَ مُحْسِنٌ ﴿١٧﴾

17. Waxayna ahaayeen kuwo wax yar Habeenki seexda.

كَانُوا فَلَدَ مِنْ أَيْلَى مَا يَهْجُونَ ﴿١٨﴾

18. Waagana way dambi dhaaf way-diisanayeen.

وَإِلَّا سَاحِرٌ هُمْ سَتَّقِرُونَ ﴿١٩﴾

19. Xoolhoodana xaq bay ku leeyi-hiin kuwa waydiista iyo kadhi-baataysan.

وَفِي أَمْوَالِهِمْ حَقُّ السَّابِلِ وَالْمَحْرُومِ ﴿٢٠﴾

20. Dhulkana waxaa ugu sugan calaamoojin kuwa wax yaqiniin.

وَفِي الْأَرْضِ مَا يَنْتَ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢١﴾

21. Naftiinna miyaydaan arkaynin (waana qaadasho).

وَفِي أَنْسَكِمْ أَفَلَا يَبْغِيُونَ ﴿٢٢﴾

22. Samada yuuna jiraa risqigiinnu iyo waxa laydiin yaboohi.

وَفِي السَّمَاءِ رُزْقٌ وَمَا تُوَعَّدُونَ ﴿٢٣﴾

23. Ebaha Cirka iyo dhulka yaan ku dhaarannaye waxa quraanku sheegi waa suganyahay sida hadalkiinna oo kale.

فَوْرَبَ الْسَّمَاءَ وَالْأَرْضَ إِنَّهُ لَعِنٌ مِثْلُ مَا أَنْتُمْ
نَطَقُونَ ﴿٢٤﴾

Sama fale Eebe wuxuu ku abaal-mariyaa wanaag iyo Janno, waxaan ka mid ah kuwa habeenki Cibaa-daysta dadkoo hurda'sidu Nabigu yidhi (naxaris iyo nabadgalyo Eebe Korkiisa hayeelee) «Dadow wax quudiya, Qaraabadaan xidhiidhiya, Salaantana faafiya, habeekiina tukada dadkoo hurda Jannada aad ku gasheen nabadgalyee».

Iyo kuwa aroorta Eebe dambi dhaaf warsada, xoolhoodana xaq ka bixiya, kuna waana qaata dhulka iyo naftoodaba, sida oo kale Cirka siduu Eebe u habeyay. saa daraadeed waa in Eebe laga yaabo wuxuu ballanqaadaya la rumeyyo illeen waa dhab sida hadalkoodee. Ad-Daariyaat (15-23).

24. Ma ku soo gaadhay warkii mar-tidii (Nabi) Ibraahiim ee sharafta la-hayd.

مَلَ آنَكَ حَدِيثُ ضَيْفِ إِبْرَاهِيمَ الْمَكْرُومِ ﴿٢٥﴾

25. Markay salaameenna, isna uu sa-laantii ka celiyey kuna yidhi waxaad ti-hiin kuwo aan la oqoonnin.

إِذْ دَخَلُوا عَلَيْهِ قَالُوا سَلَّمَ قَالَ سَلَّمَ قَوْمٌ مُنْكَرُونَ ﴿٢٦﴾

26. Markaa-su aaday ehelkiisii lana yi-mid Dibi shilis (una gawracay).

فَرَاغَ إِلَّا أَهْلِهِ، فَجَاءَهُ بِعِجْلٍ سَمِينٍ ﴿٢٧﴾

27. Una soo dhawee yay isagoo ku leh maxaad u cuni waydeen.

فَرَأَهُمْ إِلَيْهِمْ قَالَ أَلَا تَكُونُونَ ﴿٢٨﴾

28. Wuxuuna naftiisa ka kasay cabsi xaggooda ah, waxayna ku dheheen ha cabsanin, waxayna ugu bishaareeyeen wiil cilmi yeelan,

29. Markaasay soo qaabishay ha-wseenaydiisi iyadoo ku qaylyi wajigana garaaci Ma Habar mandhalays ah (yaa wax dhali).

30. waxayna ku dheheen xaalku waa saas, Eebahaaga falkasan ee waxwalba og yaa yidhi.

31. (Nabi Ibraahim) wuxuu ku yidhi xaalkiinnu see yahay kuwayohow la soo diray.

32. Waxayna dheheen waxaa lanoo soo diray qoon dambiliyaa ah.

33. Si aan ugu soo dirro korkooda dhagaxyo dhoobo (kulul).

34. Oo Eebe agtiisa loogu calaameeyay kuwa xadgudbay.

35. Markaasaan ka bixinnay kuwii mu'miniinta ahaa oo ku dhexjiray.

36. kamana aannaan helin waxaan halguri oo muslin ah ahayn.

37. Wawaana kaga tagnay dhexdeeda calaamad (ay ku waana qaataan) kuwa ka cabsan caddibaad daran.

Qisada Nabi Ibraahim iyo martidiisa waxay kaloo ku soo aroortay suuradda huud iyo ALXDR, martisoorka iyo is xurmuyntuna waa dabeecad wanaagsan oo diinta islaamku farayso sida qisadana ka muuqata. waxaa kale oo Aayaduhu caddeeyeen in Eebe awooddiisu baaxad-wayntahay, oo cid duq ah iyo midaan dhali jirinba carruur ka beero, taasina waa naxarista Eebe iyo deceeqdisa, Tan kale waa in Eebe la oqoonsado luguna waana qaato tusaaloo yinkiiisa si uu inooga nabadgaliyo caddibaad daran. Ad-Daariyaat (24-37).

38. (Nabi) Muusana calaamo lagu waana qaatuu ahaa markaan u dirray Fircoon isagoo wata xujo cad.

39. Wuuna jeedsaday isagoo la jira colkiisi, wuxuuna ku yidhi waa Saaxir ama waa waalanyayah.

فَأَوْحَىٰ مِنْهُمْ خِبَّةً فَلَمْ يَأْتِهِنَّ وَلَيَسْرُوهُ

يُعْلَمُ عَلَيْهِ ﴿٢٤﴾

فَأَفْلَمْ أَمْرَأَتُهُ فِي صَرَّةٍ وَصَسَّكَ وَجْهَهَا

وَقَاتَ عَبْرُ عَقْمٍ ﴿٢٥﴾

فَلَمْ يَأْذَنْكُمْ قَالَ رَبُّكُمْ إِنَّهُ هُوَ الْحَكِيمُ

الْعَلِيمُ ﴿٢٦﴾

فَلَمَّا فَاجَبُوكُمْ أَهْمَاءُ الْمُرْسَلِينَ ﴿٢٧﴾

فَلَمَّا أَنَّا أَرْسَلْنَا إِلَيْكُمْ بُشِّرَيْمِينَ ﴿٢٨﴾

لِتُنْزِلَ عَلَيْهِمْ حِجَارَةً مِنْ طِينٍ ﴿٢٩﴾

مُسَوَّمَةً عَدَدَكُمْ لِلْمُسَرِّفِينَ ﴿٣٠﴾

فَأَخْرَجَنَا مَنْ كَانَ فِيهَا مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٣١﴾

فَأَوْجَدْنَا فِيهَا عِرَبَيْتَ مِنَ الْمُسَلِّمِينَ ﴿٣٢﴾

وَرَكَّافِهَا إِيَّاهُ الَّذِينَ يَحْأُلُونَ النَّارَ أَلَيْمَ ﴿٣٣﴾

وَفِي مُوسَىٰ إِذَا أَرْسَلْنَاهُ إِلَىٰ فَرْعَوْنَ سُلْطَانِ مِينَ ﴿٣٤﴾

فَتَوَلَّ بِرُكْبَتِهِ وَقَالَ سَاحِرٌ أَوْ مَجْنُونٌ ﴿٣٥﴾

40. Markaasaan qabannay (cqaab-nay) isaga iyo Askartiisiiba, waxaana ku tuurray Badda isagoo la dagaalay.

فَأَخْذَتْهُ وَحْدَهُ فَنَذَرْتَهُمْ فِي الْيَمِّ وَهُوَ مُلْمِمٌ ﴿٤١﴾

41. Ree Caadna (calamo lagu waana qaato yaa ku sugar) markaan ku dirray dabayl wax halaagta.

وَفِي عَادِ إِذْ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ أَرْبَعَ الْعِصَمَاتِ ﴿٤٢﴾

42. Wax kasta oy martana ka dhigi wax tirtiran.

مَا نَذَرْتُ مِنْ شَيْءٍ أَنْتَ عَلَيْهِ إِلَّا جَعَلْتَهُ كَالْمَرْسِمِ ﴿٤٣﴾

43. Ree Thamuudna (Calaamo lagu waana qaato yaa ku sugar) markii lagu yidhi raaxaysta ilaa waqtii.

وَفِي شَمُودٍ إِذْ قَلَّ هُمْ تَمَنُوا حَتَّىٰ يَرَيْنَ ﴿٤٤﴾

44. Waxayna iska kibriyeen amarkii Eebe, waxaana qabtay Qaylo daran iyagoo eegi.

فَتَوَاعَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ فَأَخْذَتْهُمُ الصَّنْعَةُ
وَهُمْ يَنْظُرُونَ ﴿٤٥﴾

45. Mana ayna karin kicid, isumana ayna gargaarin.

فَمَا أَسْتَطَعُو مِنْ قِيَامٍ وَمَا كَانُوا مُنْصَرِينَ ﴿٤٦﴾

46. (Nabi) Nuux qoomkiisiina waa horreeyeen, waxayna ahaayeen kuwo faasiqiin ah,

وَقَوْمٌ لُّجُجٌ مِنْ قَبْلِ إِيمَنِهِمْ كَانُوا قَوْمًا فَاسِقِينَ ﴿٤٧﴾

Aayadahani waxay ka qisoon ummadihi hore ee beeniyay Nabiyadoodii iyo Rasuulladoodii iyo sida Eebe u halligay markay xaqa diideen, waana wax lagu waana qaato lagana fogaado camalkoodii oo kale, Waxay kaloo Aayaduhu caddayn in la cqaabi dulmili oo dhan, sida loo cqaabay Fircoo iyo wixii la mid aaha.

Waxaase taas u sii dheer caddibaaddii Aakhiro ee wayneyd. Ad-Daariyaat (38-46).

47. Samada annagaa u dhisnay si xoog ah, waana waasicinnay.

وَالسَّمَاءَ بَنَيْنَاهَا بِأَيْنِيرٍ وَإِنَّا لِلْمُوَسِّعُونَ ﴿٤٨﴾

48. Dhulkana waan gogollay cid wax gogoshana annagaa u fiican (Eebe).

وَالْأَرْضَ فَرَشَنَاهَا فِي نَعْمَانٍ الْمَدِيدُونَ ﴿٤٩﴾

49. Waxwalbana waxaan ka abuurray laba nooc, si aad ugu waana qaadataan.

وَمَنْ كُلَّ شَيْءٍ حَلَفَنَا رَدْجِنٌ لَعَلَّ كُنَّدْرَكُونَ ﴿٥٠﴾

50. Ee Eebe u carara (toobad keena), waxaana idiin ahay dige cade (muuqdaa).

فَقَرَرُوا إِلَى اللَّهِ بِأَنَّكُمْ مُهَنَّدُونَ دَيْرِ مُهَنَّدِينَ ﴿٥١﴾

51. Hana yeelina Eebe miciisa ilaah kale, waxaan idiin ahay dige cade;

وَلَا جَعَلُوا مَعَ اللَّهِ إِلَهًا أَخَرَ إِنَّكُمْ مُهَنَّدُونَ دَيْرِ مُهَنَّدِينَ ﴿٥٢﴾

52. Xaalku waa saas, Gaaladii Ree-Makaad ka horreysayna markastoo Rasuul uyimaado waxay dhihi jireen waa Saaxir ama waa waalanyahay.

كَذَلِكَ مَا فِي الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ مَنْ رَسُولٌ إِلَّا فَأَلْوَاهُ
سَلَّحَهُؤُجُونٌ

53. Miyay isu dardaarmeen arrintaas, waase qoom xadgudbay.

أَتَأَوْصَوْبِهِ بِئْ هُمْ قَوْمٌ طَاغُونَ

54. Ee Nabiyow iskaga jeedso xag-gooda, ma tihid mid la dagaaliye (Eebe agtiisa).

فَوَلَّ عَنْهُمْ فَمَا أَنْتَ بِمُلْمُوتٍ

55. Ee wax waani, waanaduna waxay afnici mu'minintee.

وَذَكِرْ فِيَانَ الْذِكْرِيَ شَفَعُ الْمُؤْمِنِينَ

Cirka iyo Dhulkuba waxay ku ahaadeen amarka Eebe'isagaana abuurkooda hagaajiyay, wax-walbana Eebe wuxuu ka abuuray lammaane (lab iyo dhaddig) sida uu u abuuray laba kala gaddisan, Bad Barri, macaan khadhaadh Habeen Dharaar Lab iyo Dhaddig iyo wixii la mid ah, wuxuuna u abuuray inuu ku intifaaco Dadku'kuna waana qaato darteed, oo ay Eebe xaggiisa u jeedsadaan, taasoo ah daacadisa, iyo in isagoo kaliya la caabudo lagana fogaado falkii iyo hadalkii xumaa; ee kuwii hore ee xumaa. Ad-Daariyaat (47-55).

56. Jinni iyo Insi waxaan Cibaadada-yda ahayn uma abuurin,

وَمَا حَلَقْتُ لِلْجِنِّ وَالإِنْسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونَ

57. Kamana doonaayo Risqi, iyo inay i quidiyaan.

مَا أَرِيدُ لِنَفْهُمْ مِنْ زِرْقٍ وَمَا أَرِيدُ أَنْ يُطْمِمُونَ

58. Illeen Eebe umbaa ah arsuqe xoogbadane.

إِنَّ اللَّهَ هُوَ الرَّزَاقُ ذُو الْفُوْزِ الْتَّيْنِ

59. Kuwii dulmiilowga ahay waxaa u sugnaaday. Qayb (cqaab ah) oo la mid ah tii saaxiibbadoodii (ka horreeyey) ee ha dadajisanin.

فَإِنَّ لِلَّهِنَ طَلَمُوا ذُنُوبًا مُتَّلِذُوبِ أَحَقُّهُمْ

فَلَا يَسْتَعْمِلُونَ

60. Halaag wuxuu usugnaaday kuwii gaaloobay maalintoodii (Qiyaame) ee loogu yaboohay.

فَوَلِّ لِلَّهِنَ كَفَرُوا مِنْ يَوْمِهِمْ

الَّذِي يُوعَدُونَ

Aayadahan waxay caddayn in Eebe u abuuray addoomadiisa inay caabudaan kaliya, ee uusan uga baahnayn wanaag iyo quud midna, «Cibaadaduna» waa sida ashahaadada, salaadda, Sakada, Soonka, Xajka, Jahaadka, Ammaanada, Runta, Deeqsinnimada iyo ku dhaqanka siday diintu farayso liibaanna lagu gaadho. Aakharo iyo Adduunba. Eebana wuxuu ku yidhi hadalkisii quduska ahaa: (Ibnu Aadamow cibaadadayda u kali noqo laabtaada aan ka buuxiyo hodontinnimee'faqriganee aan kaa awdee, Haddaadan sidaa falin laabtaada waxaan ka buuxin shuqul'Faqriganee kaa awdimayo) Waxaa wariyay Imaamu Axmad iyo Tirmidi iyo Ibnu Maajah.

Waana in la ogado in dulmiilowgu uu mari waddadii kuwii ka horreeyey ee Daalimiinta ahaa, Halaag iyo Balaayana waxay u sugnaan maalinta Qiyaame Gaalo. Ad-Daariyaat (56-60).